

# WAJAHID GURI KA SAARID?

Waxaa jiraa Kaalmo loogu tala galey Dadka deggan Degmada Jefeersoon, KY ee Soo wajahaaya Guri ka-saarid

## Ku dhaqaaq talaabooyinkan si aad iska ilaalo guri ka-saarid.

1. **Codso Kaalmo-** Booqo barta [STOPMYEVICTION.ORG](http://STOPMYEVICTION.ORG) si aad uga hesho macluumaad ku saabsan kaalmada ijaarka iyo korontada/biyaha. Haddii aad qabto kiis maxkamadeed oo ku saabsan guri ka-saarid, buuxi foomka Kaalmada Maxkamadda Guri ka-saarid ee Degmada Jefeerson ee ku jira Sanduuqa gaduudan.

[Soo Wac \(502\) 574-1707 haddii u baahantahay talooyin dheeraad ah](tel:5025741707)

**Qof ku kaalmeeya ma u Baahantahay?** Ururka Wadaaddada Deegaanka waxay asbuuc walbo qabaan saacado la geeyo ama laga qaado araajida iyo ka jawaabinta waxii su'aalaha la xiriiraa kaalmada ijaarka maalinta Khamiista saacadaha 10ka ilaa 2:00 duhurnimo cinwaanka goobta waa South Louisville Community Ministries, 4151/2 W Ashland Ave, Louisville, KY 40214. Hore usoo qaad heshiiska kirada guriga iyo magaca milkiilaha, lambarka telefoonkiisa, iyo e-meylkiisa.

2. **Soo Wac Xafiiska Kaalmada Sharciga si aad Kaalmo Sharchiyeed u hesho (502) 584-1254**  
Kaalmada Sharciga waa adeeg lacag la'aan ah oo siisa dadka talooyin la xiriira xuquuqdooda maxkamadda guri ka-saaridda kana matila marka ay kiis qabaan. **Haddii aad tahay qof dakhli hoose leh oo qaba canug guriga ku nool waxaa dhab ah in aad hesho matilaad sharchiyadeed (qareen lacag la'aan ah).**

3. **Ka qayb gal dhageysi dacwadeed Maxkamadda Guri Ka-saarid!**  
Waxaa Muhiim ah in aad ka soo qayb gasho dhageysiga maxkamadeed ee guri ka-saarid – xitaa haddii aad ka daahdey bixinta ijaarka, aad dhiibtay ijaarka, aad ka baxday guriga ama ku tala jirto in aad ka guurto. Tegitaanka maxkamadda waxay kaa caawin doontaa ilaalinta xuquuqdaada. Waxaa jiraan hay'ado ku soo xiri doonaa helista kaalmo kiro bixin iyo adeegyo kale.

**Waxaad xaq u leedahay waqtii dheeri ah in aad hesho si aad u xalliso khilaafka aad isku haystaan milkiilaha guriga, LAAKIIN WAXAA SHARDI AH IN AAD KA QAYB GASHO DHAGEYSIGA MAXKAMADEED.**

Maxkamadda waxay noqonaysa mid la tego ama interneedka laga qayb galo habka zoom. Ka baro habka ka qayb gelidda warqadaan boggeeda dhanka dambe.

4. **Haddii aad guriga ka guuriyso-** Wali wa MUHIIM in aad ka qayb gasho dhageysiga dacwadda maxkamadda xitaa haddii aad ku tala jirto in aad ka guurto

guriga. Ka qayb galka dhageysiga maxkamadda waxay kaa caawin doontaa ilaalinta xuquuqdaada iyo in rikoorkaada la gelinin guri ka-saarid.

Isbahaysiga Dadka Hoylaawayaaasha ayaa qabaan lacag ay kaa caawin karaan dibaa jiga la dhigto iyo ijaarka bisha ugu horreysaa. Soo wac qolada la yiraahdo Single Point of Entry **(502) 637-2337** kadib dooro lambarka 0 si aad ka hesho macluumaad dheeraad ah.

**Waxaad ka qayb geli kartaa Maxkamaadda Guri ka-saarid ee  
Degmada Jefeerson habka Zoom ama Shaqsi  
ahaan.**

**Macluumaad ku Saabsan Ka Qayb gel Habka Interneedka**

Waxaad ka qayb geli kartaa maxkamadda kombiyuutar, tablet, telefoonka smart, ama kasoo wac telefoon gacan.

**Kasoo qayb gal habka Fiidiyow adoo isticmaalaya Abka Zoom:** IDga Kulanka Zoom waa: 789 335 2944 Lambarka sirta ee **Password** waa: 308

**Kasoo qayb gal telefoon:** Soo wac 1-312-626-6799 **Id Kulanka:** 789 335 2944 **Password:** 308

**Haddii aad u baahantahay in aad uga qayb gasho kombiyuutar iyo/ama qof ku caawiya, soo wac (502)574-1707**

**Ku Qaad** telefoon **Sawirka** koodkan QR si aad uga barato isticmaalka Zoom talaabo talaabo sida loo galo barta:

<https://jeffersondistrictcourt.com/remote-court-information/>

Macluumaad Ku saabsan Ka Qayb Gal Maxkamad Shaqsi Ahaan

Waxaad ka qayb geli kartaa Maxkamad Guri Ka-saarid Shaqsi ahaan Hoolka Caddaaladda ee Degmada Jefeerson oo ku yaala **600 West Jefferson St. Louisville, KY 40202 Room 308.**

Wax ka baro xaqa aad u leedahay in aad codsato maxkamad

**garsoore dadweyne adigoo telefoonkaaga ku qaadata sawirka  
koodkan QR.**